Somali

# U codee SV si aan u gaarno mustaqbal wanaagsan!



SV

# U codee SV si aan u gaarno mustaqbal wanaagsan!

Mid ka mid ah waxyaabaha ugu waaweyn ee Norway laga helo waa heerka hoose ee sinnaan la'aanta dhaqaale ee dadka. Laakiin sannadihii la soo dhaafay, isbedel ayaa dhacay. Sinnaan la'aanta ayaa kortay. Horay looma arag heerka maalqabeenno badan oo Norway maanta jooga. Isla mar ahaantaana, noloshu aad bay ugu adkaatay dadka intooda badan.

Wax walba waxay noqdeen kuwo qaali ah. Way ka adag tahay sidii hore in lagu noolaado nolol caadi ah oo ku salaysan dakhli caadi ah.

Qalabka ugu waxtarka badan ee aan haysano si loo yareeyo sinnaan la'aanta bulshada waa daryeelka dadwaynaha. Laakiin waxaa saaran cadaadis. Kaliya maaha inaan ilaalino – laakiin waa inaan sidoo kale xoojinaa oo ballaarinnaa. SV waxay xaqiijin doontaa adeegyada tayada sare leh ee dugsiyada, xarunta barbaarinta, iyo cisbitaalada qof walba, oo leh shaqaale ku filan si ay u qabtaan shaqada. Waxaan rabnaa inaan kordhino gargaarka ilmaha, aan hubinno in ilmo kastaa tagi karo dugsiga barbaarinta, iyo dammaanad qaadka daryeelka ilkaha ee bilaashka ah dhammaan.

Deegaanka dabiiciga ah ee Norway ayaa si weyn loo burburinayaa. Isla markaana, waxa ina soo food saartay dhibaato cimileed caalami ah. Norway waa in ay hormuud ka noqotaa oo ay kaalinteeda ka qaadato. Waa in aan joojinaa furitaanka goobo cusub oo saliid soo saara oo aan hadda qaadno tallaabo aan ku ilaalineyno shaqooyinka, kala duwanaanshaha noolaha, iyo helitaanka dadka ee deegaanada dabiiciga ah.

SV waxay garab taagan tahay dadka ay saameeyeen dagaalada iyo cadaalad darada. Waxaan ka shaqeyneynaa inaan kordhino gargaarka caalamiga ah, si aan u taageerno dadka ka soo cararaya colaadaha, waxaanan cambaareyneynaa dhammaan weerarrada ka dhanka ah dimoqraadiyadda – sida kuwa aan ku aragnay Mareykanka uu Donald Trump xukumo. Marna ka tanaasuli mayno dagaalka loogu jiro Falastiin xor ah, waxaanan garab istaagnaa dadka reer Ukraine halganka ay ugu jiraan xorriyadda.

Ma nagu raacsan tahay? U codee SV Sibteembar 8deeda!

**Sosialistisk Venstreparti**
Møllergata 4, 0179 Oslo
21 93 33 00
post@sv.no
sv.no

**Bli medlem i SV her:**